



Waa maxay ciqaab dhallinyaro iyo la socoshada qof dhallinyaro ah?

Warbixin ku socota dhallinyarada iyo abbaanka



Buugyarahen maclummaadka ah waxaa soo saaray
Xoghaynta Golayaasha Khilaaf-xallinta.

Sebtembar 2024



Golaha xallinta khilaafyada ayaa buugyaraahaan kuugu sharraxaya waxa loola
jeedo ciqaabta dhallinyarada iyo la socoshada dhallinyarada.
Kulanka kaddib waxaa lagu siin doonaa hal nuql oo buugyaraha ah.

Warbixin intaan ka badan ka eeg: www.konfliktraadet.no

1. WAA MAXAY CIQAAB DHALLINYARO IYO LA SOCOSHO DHALLINYARO?

Ciqaabta dhallinyarada (ungdomsstraff) iyo la socoshada dhallinyaradu (ungdomsoppfølging) waa tallaabooyin ciqaab ah oo u gaar ahaan dhallinyarada.

Xukunka ciqaabta dhallinyarada waxaa go'aamiya maxkamadaha, waxayna socon karaan afar bilood ilaa laba sano (ilaa saddex sano haddii ay jirto xaalad gaar ahi).

La socoshada dhallinyarada waxaa go'aamiya xeer ilaalinta, waxayna socon kartaa afar bilood ilaa hal sano. Waxaa shardi ah inaad oggoshahay, aqbashid, la socoshada dhalinyarada.

Doorashada nooca ciqaabta iyo muddada ciqaabtu soconayso waxay ku xidhan tahay waxyaabo ay ka mid yihiin sida kiisku u adag yahay. Noocyada ciqaabtu waxa ay ka siman yihiin in aad ka qayb qaadan doonto samaynta qorshe dhallinyaro oo ka kooban tallaabooyin/hawlo lagaa rabo muddada ciqaabtu soconayso, iyo in ay kula socon doonaan koox kaa warhaynaysa.

Xilliga gudashada xukunka ciqaabta waxaan ka hadli doonaa dembiga aad gashay, waxaadna la kulmi kartaa qofkii ama dadkii aad dambiga ka gashay, haddii ay iyagu rabaan inay kula kulmaan (kulun dib u sixid ah).

Ciqaabta dhallinyarada iyo la socoshada dhallinyaradu waxay ku saabsan yihiin inaad isbeddel ku samayso noloshaada, inaad qaadato mas'uuliyadda wixii aad samaysay, iyo inaan si wadajir ah ugu guulaysano in mustaqbalkaagu fiicnaado. Waa inaad niyad u hayso oo aad diyaar u tahay inaad samayso dadaal, laakiin isku-duwaha dhallinyarada (ungdomskoordinator) iyo kooxda la socoshada ayaa si dhow kuula socon doona oo ku taageeri doona xilliyada aad ka niyadjabto hawlahaa socda.

Ujeedadu waa inaadan galin dembiyo cusub.



Sidee u aragtaa arrintan? Su'aalo ma qabtaa?

2. DIYAARGAROW

Waa in aan is barannaa si aan kuugu samayno qorshe dhallinyaro oo wanaagsan. Waxaan sidaas darteed kaa wareysan doonaa sida xaalkaagu yahay, sida aad dooneyo in ay noloshaadu ahaato, sida aad uga baaqsan karto in aad sharciga jebiso iyo waxa aad adigu qaban karto si aad hadafkaas u gaarto. Wuxuu aad u baahan tahay in lagaa caawiyoo, iyo cidda kaa caawin karta. Waa kuwee dadka muhiimka kuu ah? Waxaan sidoo kale wareysan doonaa dadka kuu yaqaanna si aan u ogaanno waxqabadka lagu darayo qorshahaaga dhallinyarada. Waxaan sidoo kale kaala hadli doonaa dadka ka mid noqonaya kooxda kula soconaysa.


3. BILLOWGA

Fulinta ciqaabtu waxay ku billaabanyasa kulanka qorshaha dhallinyarada oo adiga iyo isu duwaha arrimaha dhallinyaradu samaysaan qorshe dhallinyaro adinka oo kaashanaya kooxda la socoshada. Qorshuhu waa in ay ku jiraan waxqabad lagaaga baahan yahay in aad qabato muddada ciqaabta.

Golaha xallinta khilaafku waxa uu marka hore soo ogaanaya cidda aad la yeelan kartid kulan dib u sixid ah.



Sidee u aragtaa arrintan? Su'aalo ma qabtaa?



4. QORSHAHADHALLINYARADA IYO KOOXDA LA SOCOSHADA

Qorshaha dhallinyaradu waa inuu sheegaa waxa lagaa rabo inaad samayso. Ujeedada tallaabooyinka qorshuhu waa inaadan mustaqbalka gelin dembiyo cusub. Wuxaad ka qayb qaadanaysaa samaynta qorshaha. Wuxaad soo kaxaysan kartaa qareenkaaga marka qorshaha dhallinyarada la samaynayo.

Haddii aadan raalli ka ahayn waxyaabaha ku jira qorshaha, wuxaad u dacwoon kartaa golaha xallinta khilaafka saddex toddobaad gudahooda kadib kulanka qorshaha dhallinyarada. Dacwadaada waxa qiimayn doona xog-haynta golayaasha xallinta khilaafyada. Wuxa aad xaq u leedahay in qareen/looyer kaa caawiyo kiiskan.

Hoos wuxaad ku aragtaa tusaalooyin ah tallaabooyin ka mid noqon kara qorshaha dhallinyarada.

QORSHAHADHALLINYARADA EE HENRIK QABYTA 1AAD – TUSMO

Ciqaabta dhallinyarada waxaan samayn doonaa hawlahan	
Hawsha 1aad	Iskuulka aad
Hawsha 2aad	aadista wadahadalka BUP
Hawsha 3aad	la hadalka sarkaal boolis Marte Lillekroken
Hawsha 4aad	ma isticmaalayo maandooriye sharcidarro ah, waxaan iska qaadayaa baaritaanka maandooriyaha, waxaanan la hadlayaa la-taliyaha maandooriyaha
Hawsha 5aad	aadista tababbarka kubbadda cagta
Hawsha 6aad	Inaan guriga imaado ugu dambayn 22.00 maalmaha caadiga ah, iyo 23.30 maalmaha habeennda jimcaha iyo sabtida



Waxqabadyada oo dhan si faahfaahsan ayaa loogu sharraxayaa qorshaha dhallinyarada. Halkaan waxaa ah tusaale taas lagu muujinayo.

QAYBTA 3AAD - HAWLAHA

Shax muujinaysa waxyabaha Henrik samaynayo xilliga gudadasha ciqaabta dhallinyarada

SHARDI GUUD: HA GELIN DAMBIYO CUSUB		
Hawsha 3aad	La hadalka booliska	
Maxay	Haddii aysan wakhti kale ku ballamin, wuxuu Henrik labadii talaadaba mar markay saacaddu tahay 15, wadahadal la yeelanayaa sarkaaladda booliska ee Marte Lillekroken. Waxay tusaale ahaan ka wada hadli doonaan sidii uu Henrik uga fogaan lahaa xaaladaha keeni kara in uu galo denbiyo cusub.	
Halkee	Saldhingga Hamar ama meel kale oo lagu heshiisyay.	
Muddada	Billow: 01.08.2024	Dhammaad: 01.08.2025
Ujeeddo	Waa in Henrik ka fogaado bulshooyinka xun oo laga caawiyo inuu ka fogaado gelista denbiyo cusub.	
Mas'uuliyadda la socoshada		
Yaa la soconaya	Magaca: Marte Lillekroken	Kaalin/goobta shaqada: sarkaalad boolis, saldhiga Hamar
Ballan gaar ah	Marte ayaa farriin xasuusin ah u diraysa Henrik maalinta ka horraysa ballanta	

Kooxda la socoshada ayaa kula soconaysa muddada ciqaabta. Kooxdoo waxay ka koobnaanaysaa dadka mas'uulka ka ah waxqabadyada qorshaha dhallinyarada, iyo dadka ka caawinaya.

Waxaa kooxda ku jiri kara dad qoyskaaga ah, ama ka socda booliska, hay'adda daryeelka denbiilayaasha [kriminalomsorgen], iskoolka, maadinta carruurta [barnevernet], laamaha caafimadka, islamarkaana waxaa ka mid noqon kara dadka kale ee noloshaada saamaynta ku leh sida tababbare, deris ama qof ay qoyska saaxiib wanaagsan yihiin.

Haddii aad ciqaab dhallinyaro gudanayso, had iyo jeer waa in ay booliska iyo hey'adda daryeelka denbiilayaashu ka mid ahaadaan kooxda kula soconaysa.





5. HABRAACA IYO KULANKA SIXIDDA GEFKII DHACAY

Golaha xallinta khilaafyada ayaa kuu qabanqaabin doona inaad kulan sixid ah la yeelan kartid qofkii ama dadkii aad dambiga ka gashay, haddii ay taasi suurtogal tahay. Dib u sixiddu waxay ku saabsan tahay hagaajinta dhaawaciil iyo caddaalad darradii dhacday, sida ugu macquulsan.

Kulankaas oo kale waxaad kaga hadli doontaan wixii dhacay, sidii ay xaaladdi-innu ahayd kadib wixii dhacay, iyo waxa muhiimka idii ah wixii hadda ka dambeeyaa.

Waxa kale oo jiri kara dad aan dhibbanaha ahayn laakiin dambiga aad gashay saameeyay, oo iyaguna u baahan kara inay kula yeeshaan kulan sixid ah.

Waxaana laga yaabaa inay jiraan dad kale oo aad u baahan tahay inaad la hadasho. Adigoo la kaashanaya isuduwaha arrimaha dhallinyarada, waxaad ogaan kartaan cidda aad u baahan kartid inaad la yeelato kulamo sixid ah.

Qayb muhiim ah oo ka mid ah gudashada xukunka ciqaabta ayaa ah qaadas-hada mas'uuliyadda wixii aad samaysay, markaa waa inaad si kastaba ku xisaabtid inaad ka hadli doonto dembiga aad samaysay, adoo la khadlaya isuduwaha dhallinyarada ama ka qaybgalayaasha kooxda la socoshada.

6. WADAAGISTA MACLUUMAADKA

Si aad u gudan kartid cqaabta dhallinyarada ama la socoshada dhallinyarada, waa inaad oggolaatid in macluumaadka sirta ah ee kugu saabsan loo sheegi karo kooxda la socoshada iyo kooxda isuduwidde ee golaha xallinta khilaafyada (KOG). Oggolaanshuu wuxuu khuseeyaa macluumaadka la wadaagayo ka hor iyo inta lagu jiro gudashada cqaabta. Kaliya macluumaadka khuseeyaa gudashada cqaabta ayaa lala wadaagi karaa.

KOG waxaa ka mid ah wakiilo ka socda booliiska, xeer-ilaaliyaha booliiska, golaha xallinta khilaafyada iyo hay'adda daryeelka dambiiayaasha. Mararka qaarkood wakiillo ka socda wakaaladda caafimaadka, maadinta carruurta iyo adeegyada kale ayaa sidoo kale ka mid ah. KOG waxa ay iyaga la wadaagaysaa macluumaad kugu saabsan si loo qiimeeyo in kiiskaagu ku habboon yahay cqaabta dhallinyarada ama la socoshada dhallinyarada. Haddii loo baahdo, KOG waxa kale oo ay la talin kartaa isuduwaha dhallinyarada inta aad ku jirto gudashada cqaabta.

Kooxda la socoshadu waxay wadaagaan macluumaad kugu saabsan si ay ku taageeri karaan una hubin karaan inaad fulinayso hawlaha ka mid ah qors-haha dhallinyarada ee xilliga gudashada cqaabta.



Sidee u aragtaa arrintan? Su'aalo ma qabtaa?



7. MAXAA ADIGA LAGAA DOONAYAA?

Waa inaad fulisaa waxyaalaha lagu ballamay ee ku qoran qorshaha dhallinya-rada. Midda ugu muhiimsanna waa inaad ka soo baxdo dhammaan ballamaha, inaad timaaddo oo fuliso waxqabadyada lana shaqaysyo kooxda kula socota.

Waa inaad

- gacan ka geysato samaynta qorshaha dhallinyarada iyo fulintiisa adiga oo la shaqaynaya kooxda kula socota
- ka hadashid dambiga aad gashay, oo qaadatid mas'uuliyadda wixii aad samaysay
- inta aad ciqaabta gudanayso goobtii lagu ballamay ku timaaddo wakhtigii la ballamay
- keentaa warqad dhakhtareed haddii aad jirrato

Waa in aanad

- denbiyo cusub gelin muddada aad ciqaabta gudanayso;
- khamri iyo maandooriye kale midna ku sarkhaansanayn mararka aad la kulmayso kooxda kula socota ama kulammada/waxqabadyada ku qoran qorshaha dhallinya-rada. Haddii lagaaga shakiyo in aad kulanka timid adiga oo sarkhaansan, waxaa markaas lagaa dalbi karaa in lagaa qaado tijaabo arrintaas lagu baarayo.
- dibedda u dhoofin inta aad ciqaabta gudanayso. Waxaa mararka qaarkood dhici karta in uu isu duwaha arrimaha dhallinyaradu ku fasaxo. Laakiin waa in aad wakhti fican ka hor codsataa;
- u hanjebin dad ka qaybqaataa fulinta ciqaabtaada ama aadan bey'adda ku yeelan saamayn taban.



8. MAXAA DHACAYA HADDII AAD KA SOO BIXI WEYDO WAXYAALAHAA LAGAA DOONAYO?

Haddii aad jebiso qodobbada qorshaha dhallinyarada ama waxyaalaha kale ee lagaa doonayo waxaa dhici doona waxyaalaha soo socda

- digniin afka ah
- wadahadal ku saabsan heshiiska aad jebisay

Golaha xallinta khilaafku waxa kale oo uu qorshaha ku dari karaa tallaabooyin adag sida in aad

- joogi karin meelo la cayimay
- la joogi karin shakhsiyaad la cayimay
- isticmaali karin khamri ama maandooriye kale, iyo inaad iska qaaddid baaritaan maandooriye
- la hadashid booliska, hay'adda daryeelka dembiileyaasha ama dad kale oo ka tirsan kooxda la socoshada
- in aas iska xaadirisd booliska, hay'adda daryeelka dembiileyaasha ama golaha xallinta khilaafyada

Haddii aad mar kale jebiso shuruudaha, qorshe dhallinyaro oo cusub oo tallaabooyin kale leh ayaa la samayn karaa.

Marka ay tahay ciqaab dhallinyaro, maxkamaddu waxay go'aamin kartaa inaan laguu oggolayn inaad joogtid meelo cayiman, inaad guriga joogto



UNGDOMSOPPFØLGING
UNGDOMSSTRAFF

UNGDOMSPLAN

RELASJONSBYGGING

wakhtiygo'an, ama inaan laguu oggolayn inaad la xiriirto dad cayiman. Tallaabooyinka noocan oo kale ah waxaa la fulin doonaa iyadoo la isticmaalayo kontoroolka elektarooningga ah (silsiladda canqowga).

Xadgudubyada cusub waxay sidoo kale keeni karaan in la joojiyo gudashada ciqaabta golaha khilaafka. Haddii ciqaabtu tahay la socosho dhallinyaro, xeer-ilaalinta ayaa kiiska mar kale go'an ka gaari doonta. Haddii ciqaabtu ay tahay ciqaab dhallinyaro, natijjadu waxay noqon kartaa in maxkamaddu ay go'aamiso in aad gudatid qayb ka mid ah ama dhammaan xukunka xabsiga, ama in ciqaabta dhallinyarada loo beddeko ciqaab ah shaqo bulsho ama xukun xabsi ah oo shuruudaysan

Haddii aad denbiyo cusub gasho adigoo aan dhammayn gudashadii ciqaabta, xeer-ilaalinta ayaa go'aaminaysa waxa laga yeelayo ciqaabtii aad markaas gudanaysay.




Sidee u aragtaa arrintan? Su'aalo ma qabtaa?

Warbixinnda buugyarahaan lagugu siiyay waxaa laga soo qaatax eerarka soo socda: Ciqaabta dhallinyarada: xeerka ciqaabta cutubka 8 a

La socosho dhallinyaro: Xeerka Habka Kiisaska Ciqaabta § 71 a faqradda 2aad
Fulinta ciqaabta: Xeerka Golaha Xallinta Khilaafyada Cutub 4

Qareen: Xeerka Habka Kiisaska Ciqaabta § 96 faqradda 3aad, § 99 iyo § 100 faqradda 2aad





Konfliktrådet

Sekretariatet for konfliktrådene
Mariboes gate 13, 0183 Oslo

www.konfliktraadet.no